*EGD GA LAGU SAMEEYO QALABKA LA SOCOSHADA EE BRAVO pH*

*TAARIIKHDA EGD EE MUDDEYSAN____________________*

**WAQIGA SOO GELITAANKA WAXA LA SHEEGI DOONAA 1 TODDOBAAD KAHOR*

*CENTRACARE – WILLMAR SURGERY CENTER        CENTRACARE – RICE MEMORIAL HOSPITAL*

*Robert Johnson, MD        Tyler Goettl, MD*

**WAX KU SAABSAN SHAYBAADHKA**

Laab-dillaac soo noqnoqda ama dabadheeraada waxa dhici karta inay weheliso dhibaato ka halisnimo badan oo loo yaqaan GERD (cudurka soo noqodka asiidha ee hunguriga iyo caloosha). Dhaawaca uu sababo GERD waxa dhici karta in uu keeno dhibaatooyin caafimaad oo ka halisnimo badan sida liqitaanka oo adkaada, hunguriga oo cidhiidhi noqda, iyo Barrett's esophagus.  Nidaamka la socoshada ee Bravo pH waa shaybaadh loogu talagalay qiimeynta laab-dilaaca ama calaamadaha la xidhiidha.

EGD sidoo kale waxa loo yaqaanaa upper endoscopy. Waxa lagu sameeyaa tuumbo dhuuban, oo jilicsan oo Waxa lagaa gelinayaa afka waxaana lagu dhaadhicinayaa illaa marina dheefshiida ee sare. Waxa ay u sahashaa dhakhtarkaaga in uu eego hungurigaaga, calooshaada, xaaladaha inta ugu badana qayb ka mid ah mindhicirkaaga yar ee loo yaqaan labiyo tobanlaha "duodenum". Dhakhtarku waxa uu ku dhejin doonaa qalab la socosho oo BRAVO pH ah diirka sare ee hungurigaaga inta lagu gudo jiro shaybaadhka si uu u arko inta ay le'eg tahay asiidha ku jirta qaybta hoose ee hungurigaaga. Shaybaadhkani waxa uu ka caawiyaa dhakhtarkaaga in uu qorshayaal u samaysto daaweynta haddii loo baahdo.

**WAXA AY TAHAY IN LA FISHO**

Inta lagu gudo jiro EGD ga, dhakhtarkaagu waxa uu gelin doonaa kaabsal asiidh soo noqodka lagu cabbiri doono oo Bravo ah hungurigaaga isaga oo adeegsanaya qalab gaadhsiin. Shaybaadhka waxa ku jira kaabsol pH oo yar, oo ah ku dhawaad xajmiga furka jeesha, kaas oo si ku meelgaadh ah loogu dhejiyo gidaarka hungurigaaga. Inta ay socoto muddada shaybaadhku, kaabsolka asiidh soo noqoshada lagu cabbiro ee Bravo waxa lagu cabbiri doonaa pH ka hungurigaaga waxaana uu u gudbiyaa macluumaadkan diiwaangeliyaha asiidh soo noqoshada Bravo ee lagu xidhay jidhkaaga. Kahor gelinta, waxa lagu bari doonaa sida loo adeegsado diiwaangeliyaha asiidh soo noqoshada ee Bravo iyo waxa aad u baahan tahay in aad ku qorto xusuus-qorka muddo 48 saacadood ah. Marka shaybaadhka la dhamaystiro kadib 48 saacadood, diiwaangeliyaha waa uu bakhtiyi doonaa waxaana aad soo celin doontaa diiwaangeliyaha iyo xusuus-qorka si xogta shaybaadhkaaga loo soo dejin karo si falanqayn loogu sameeyo. Waxa lagu siin doonaa wax aad kusoo rido iyo tilmaamo ay ku qoran yihiin sida, goorta iyo halka ay tahay inaad ku soo celiso diiwaangeliyaha.  Macluumaadka waxa falanqayn doona dhakhtarkaaga si uu u baadho xaaladdaada. Kaabsolka asiidh soo noqoshada lagu cabbiro ee Bravo waxa uu ugu dambeyn kasoo dhici doonaa hungurigaaga waxana uu dhaafi doonaa dhuuntaada dheefshiidka waxana la saari doonaa inta lagu gudo jiro qashin saarka saxarada, taas oo qaadan karta illaa laba toddobaad. Kaabsoolka waxa lagu falaash gareyn karaa musqusha.

**U DIYAARGARAWGA HABRAACA**

- Waxba lama cunayo kadib saqda dhexe waxna lama cabbayo 3 saacadood kahor imaanshaha habraacaaga.

- Haddii aad wax xasaasiyado ah ama elerji ah ka qabto biraha ay kamid yihiin chromium, nickel, copper, cobalt, iyo iron, fadlan u sheeg dhakhtarkaaga habraaca.
- Fadlan jooji daawooyinka yareeya aysiid soo noqoshada kahor shaybaadhkaaga.
- **Si loo yareeyo haliska dhiig baxa inta lagu gudo jiro ama kadib habraacaaga, waxa aanu kaa dalbanaynaa inaad joojiso daawooyinka lidka-xinjirawga jadwal-wakhtiyeedka soo socda. Fadlan ku wargeli dhakhtarkaaga daawada kuu qora:**

| 7 MAALMOOD KAHOR EGD GA | 5 MAALMOOD KAHOR EGD GA | 3 MAALMOOD KAHOR EGD GA | 48 MAALMOOD KAHOR EGD GA | 24 MAALMOOD KAHOR EGD GA |
|---|---|---|---|---|
| Nexium (esomeprazole)<br>Aciphex (rabeprazole)<br>Prilosec (omeprazole)<br>Prevacid (lansoprazole)<br>Protonix (pantoprazole)<br>Dexilant, Zegerid, Kapidex | **Coumadin (warfarin)**<br>**Plavix (clopidogrel)**<br>**Brilanta (ticagrelor)** | **Eliquis (apixaban)**<br>**Pradaxa (dabigatran)**<br>**Xarelto (rivaroxaban)** | Zantac (famotidine)<br>Carafate (sucralfate)<br>Pepcid (famotidine)<br>Reglan (metoclopramide)<br>Tagamet (cimetidine) | Jooji wixii daawo lidka asiidha ah ee aan dhakhtar qorin ee kale sida TUMS ama Rolaids |

**TAARIIKHDA LA AMRAY IN LA JOOJIYO DAAWOOYINKA ASIIDH SOO NOQOSHADA:__________________**

**TAARIIKHDA LA AMRAY IN LA JOOJIYO JILCIYEYAASHA DHIIGGA:_________________________________**

**SUBAXDA HABRAACAAGA**

Qorshee inaad timaaddo wakhtiga imaanshaha ee lagu siiyey Filo inaad u joogto halkan 2 illaa 4 saacadood habraacaaga iyo wakhtiga soo kabashadaada. Haddii darawalkaagu ka tago xarunta inta lagu gudo jiro shaybaadhka, waxa aanu u baahan doonaa lambar taleefan oo isaga ama iyada laga la xidhiidhi karo. Darawalkaagu waa inaanu masaafo 30 daqiiqo loo socdo ka fogaan qaybta endoscopy ga.

**INTA LAGU GUDO JIRO HABRAACA**

- Kadib marka aad isdiiwaangeliso waxa aad xidhan doontaa goon isbitaal.
- Kalkaaliye caafimaad ayaa dib u eegi doona liiska daawooyinkaaga, xasaasiyadahaaga, iyo taariikhdaada caafimaad.
- Tuumbo xidid (IV) ayaa lagu gelin doonaa si lagaaga siiyo daawada inta lagu gudo jiro shaybaadhka.
- Waxa lagu siin doonaa foom ogolaansho si aad u akhrido oo aad u saxeexdo.
- Marka kalkaaliyaha caafimaad ku diyaariyo, waxa laguu qaadi doonaa qol gaar ah halkaas oo shaybaadhkaaga lagu sameyn doono.
- Waxa lagaa siin doonaa daawooyin IV gaaga si lagaaga caawiyo inaad nafisto. Waxa ay u badan tahay inaad u jiifsato dhinacaaga bidix.
- Dhakhtarku waxa uu tuumbada gelin doonaa afkaaga illaa hungurigaaga, calooshaada iyo labiyo tobanlahaaga.
- Kaabsoolka Bravo waxa la gelin doonaa cidhifka hoose ee hungurigaaga kadib baadhis dhamaystiran.

**KADIB HABRAACA**

- Waxa laguu qaadi doonaa aag soo kabasho si wakhti loo siiyo suuxidintu inay kaa ba'do.
- Qorshee inaad maalinta fasax ka qaadato shaqada oo aad ku nasato guriga kadib habraaca.

- Daawada lagu siiyey intii lagu gudo jirey shaybaadhka waxa ay kugu keeni kartaa inaad yeelato isbeddelo xusuuseed iyo in uu daciifo xukunkaaga maskaxeed. Ka kaxeyn gaadhi ijiin leh ama ha ku shaqeyn mishiin culus. Ha saxeexin wax waraaqo ah ama ha sameyn wax go'aano sharciyeed ah.
- **Waa inaanu kaa fogaan receiver kaagu masaafo 3 fuudh ah dhammaan wakhtiyada inta lagu gudo jiro muddada shaybaadhka ee 48 saacadood ah.**
- Ma mari kartid MRI muddo 30 maalmood ah gudahood kadib habraacaaga.

**WAA INAAD KA DAAWATO MUUQAALKA TILMAAMAHA LA SOCODKA PH EE BRAVO YOUTUBE KA KAHOR IMAANSHAHAAGA.**

https://www.youtube.com/watch?v=bHAt7CTKz7g